

## Samarka

Saamarku waa bulsho reer guuraa ah oo ku nool dalal kala duwan oo kala ah Finland, Iswidan, Noorway iyo ruushka. Samarku waa dad reer guuraa ah asalkoodii oo degan meelo cayiman. Taas oo macnaheedu yahay in ay deegaan ahaayeen intii aanay dawladdu xadaynta samaynin. Samigu waxa ay leeyihiin deegaan u gaara ah oo luuqadooda, dhaqankooda iyo sooyaalka taariikhda ay ku ilaashadaan.

Tirakoobka samarka waxaa lgu qiyaasaa inta u dhaxaysa 60 000 illaa 70 000 samar. Isidhan waxaa degan qiyaas ahaan 17 000 samar, Finland waxaa degan qiyaas ahaan 7500 samar Ruushkanna illaa 2000 ayaa degan. Norge waxaa lagu qiyaasaa in ay degayihiin illaa 40 000 samer. Intooda ugu badani waxa ay degayihiin dhinaca waqooyi ee Saltfjellet iyo magaaloyinka waaweyn sida Oslo oo kale.



### **Reinkappkjøring (tartanka deerada)**

*Yaa ugu dheereeyay?*

*Deerada ugu dheeraysaa waxa ay ordi kartaa 60 km/saacaddii!*

*Tartanka baratanka deerada waxaa qabanqaabiya koobka u gaar ah Norge (norges mesterskap) iyo waliba (nordisk mesterskap) oo ka dhexeeya iskandanafiyanka reinkappkjøring.*

### **Maalinta qaranka Saamarka**

6. februar. Waa maalinta qaranka samarka Maalintu waxay ka dhaxaysaa saamarka deggen Noorway, Iswidhan, Finland iyo Ruushka. Maalintani waxa ay astaan u tahay markii u horaysay ee dadka saamarka ahi shir guud ku kulmaan magaalada Trondheim ee ku taalla woqooyiga Noorway. Waa markii u horaysay taariikhda ee saamarka dega koonfurta iyo woqooyiga Noorway iyo kuwa dega Iswidhan ay kulmaan danahoodana ka wada hadlaan.

Maalinta qaranka Samarka waxaa la dhahaa **Sámi sogá lávlla**, macnaheeduna waxa weeyey heesta qaranka samarka *Samefolkets sang* Maalinta qaranka Samarku waa maalin calanka la saaro oo qiimo ku leh nNorge. waxaana la sameeyaa dabaldegyo kala duwan oo ay ka midyihiin in calamada Norge iyo ka Samarkaba kor loo saaro. Meela badan oo Norge ka mid ahna xafladdo iyo dabaaldegyo ayaa laga sameeyaa. Magaalada Tromsø todobaad ayaa laga dabaaldagaa iyada oo la samaynayo xafladdo kala duduwan kuwaas oo ay ka mid yihiin heeso riwaayaddo iyo baratanka deeradda (reinkappkjøring).

### Calanka Samarka

Callanku waxa uu ka dhexeeyaa Saamarka deggen Noorway, Iswidhan, Finland iyo Ruushka.

Nashqadda guud waxa laga soo dheegtay gabayga dhaqameedka samarka oo muujinayaan in ay yihiin wiilashii iyo gabdhihii qorraxda. Goobada ku taal calanku waxa ay astaan u tahay qorraxda iyo dayaxa. Waxana go'aamiyey isticmaalkiisa golaha shacabka ee Samarka.



### Luuqadda Samarka

Luuqadda Samarku ma'aha hal luuqad oo isku mid ah waxa ay ka koobantahay 11 (kowb iyo toban) luuqadood oo kala gedisan. Luuqadaha Samarka waxa ay isku asal yihiin luuqaha finsk, estisk iyo ungarsk.

Saamarka woqooyi (nordsamisk) waa qayb luqadeeda saamarka ee isticmaalkeedu ugu wayn yahay marka loo eego qaybaha luqadda saamarka. waxana ku hadla saamarka dega Noorway, Iswidhan iyo Finland. Luuqadda Saamarka koonfureed meel hoose ayey maanta joogaan, waayo luqadda Saamarka koonfureedku ma aha luqadda ay maalin walba isticmaalaan marka la eego qoysas badan. Waxa ka wanaagsan Lulesamika oo iyagu caruurtooda luqadda saamarka lagu baro guayaha iyo dugsiyadaba.

**Bures** (oo u codaysma Bores) macnaheeduna uu yahay salaamu calaykum (Hei) afka samaka waqooyi.

**Lavvo og pulk** er samiske ord som vi bruker på norsk

Maalinta 6. febrayo waxaan nidhaahnaa :

**Lihku beivviin! Oo macnaheedu yahay hambalyo( Gratulerer med dagen!)**



Skaller

Kabbo Samar



Mann som har på seg samekofte. Han har fanget en rein med lasso. I bakgrunnen ser vi en lavvo.

Waa nin xiran dharka Samarka oo soo qabtay deero samar. Hortiisana waxa ah aqalka Samarka



Kvinne som har på seg pesk. Hun kjører snøscooter.

Gabadhan xiran dharka Samarka waxa ayna waddaa mootada barafka

Alle bilder er fra Shutterstock